



## Xafiiska Qarammadda Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

### **Warqad ku socota Jaaliyadda Soomaaliyeed ee Qurbaha ku nool (No. 25)**

Nairobi, 28 May 2010

Assalamu Calaykum,

Dhammaantiin iga guddooma salaan aad u diiran,

1 Arrimo baddan oo horumar leh ayaa ka dambeeyay warqadedyii ugu dambeysay ee aan idiin soo qoro waxaana weydiistay xafiiskayga inuu mar walba idin la socodsiiyo wixii arrimo ah ee dhaca hadba marka la ogaado. Wuxaan jeclahay inaan fursadan ka faa'iideysto oo aan warbixin kooban idin siiyo maadama aanu ku jirno gebgabadii bishan.

2 Horaantii bisha May, waxaa wareysi ila yeeshay jariidadda la yiraahdo AllAfrica taasoo aan mar labaad ku sheegay fikradahayga ugu muhiimsan ee aan ka aaminsanahay xaalada Soomaaliya: in xaaladda sida ay hadda tahay aysan ahayn dariiq la qaadan karo; in loo baahan yahay in dhammaan wadamada Afrikaanka iyo Hay'ad Goboleedyada sida IGAD ay qaadaan tallaabo si loo taageero Soomaaliya; in Dawladda Federalka KMG ah iyo bulshada Caalamkuba ay diiraddoodu saarnaato arrimaha muhiimadda u leh Soomaaliya; in wax laga qabto isla xisaabtan la'aanta; ugu dambeyntiina in sida ugu tayo badan uguna waxqabad leh ee ay Qaramada Midooway ku taageeri karto Soomaaliya ay tahay inay ka hawlgasho una guurto Moqdishu.

3 Dhowaan waxaanu soo gebagabaynay Shirkii Istanbul oo saddex (3) maalmood qaatay loogana hadlayey Soomaaliya. Wuxaan ku faraxsanahay inaan iraahdo in shirkii noqday mid aad loogu guuleystay waxaana mahadaas iska leh dad badan oo idinka idin ka mid ah iyo dhaqaalaha ganacsatada Soomaaliyeed. Arrintaas waxay ahayd tallaabo aad u wanaagsan oo ganacsatadu wax kula wadaageyso ganacsatada caalamka kulana shaqeynayo dawlada sidii dhidibada loogu aasi lahaa hormarin dhaqaale. Talo soo jeedintii laga soo saaray miiska wadahadalka oo ay isla wada garteen qeybaha ganacsatada ee kala duwan ee shirkii ka qeyb galaysay ayaa ahaan doona kuwa si joogto ah loola socdo waxaana la socon doona xafiiskayga toddobaadyada soo socda. Intiina aan fursadda u helin inay ka soo qeybgalaan shirkii waxay daawan karaan goobta Internet-ka ama website-ka loo abuuray shirkii oo ah: [www.istanbulconferenceonsomalia.org](http://www.istanbulconferenceonsomalia.org) halkaas oo aad ka heli doontaan wixii faahfaahin ah.

4 Sidaan horey idiin kugu sheegay, waxaan ku faraxsanahay natijada ka soo baxday shirka. Ganacsatada gaarka ah ee Soomaaliyeed waxay si tusaale leh u muujiyeen in ay dadka Soomaaliyeed yihiin kuwo leh hal abuur iyo waayo aragnimo ganacsi kuwaas oo muujiyey markii ay ka hadlayeen guulaha ganacsi ee ay qaarkood gaareen. Haddaba dhammaan siyaasiyiinta dalka ayey jirtaa inay wixii horumar ah ee shirkan lagu gaaray wax ku dhisaan siina horumariyaan, muujiyaana inay dalka ka jirto rajo ah in Soomaaliya ay dhaqaalaha adduunka wax ku kordhin karto. Waxaan rajaynaya in hay'adaha KMG ah ee Federaaliga ah oo uu Baarlamaanku ka mid yahay ay muujin doonaan wadashaqeyn dhexmarta, is barbartaagid iyo taageero la siiyo qaybaha kala duwan si markaasi Soomaaliya ugu soo noqoto xasillooni una soo jiidato maalgelinta Aadka loogu baahan yahay, inta la soo jiidan lahaa wararka xun ee niyad jabka leh ee ay warbaahintu faafiso.

Waad mahadsantihii  
Walaalkiina  
Ahmedou Ould-Abdallah